

Barwaaqo

Adeegyo Isku-dhafan iyo Maareeyaha Kiiska



Waa maxay Sharciga Barwaaqada?

Sanadkii 2021, waxaa Act on Integrated Services for the Benefit of Children's Well-Being No. 86/2021 laga ansixiyay Iceland. Ujeeddada sharcigan waa in la hubiyo in dhammaan carruurta ku nool Iceland ay helaan adeegyo isku-dhafan. Yaa codsan kara adeegyada isku-dhafan?

Dhammaan waalidiinta iyo carruurta ku nool Iceland waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan adeegyada isku-dhafan. Waxa kale oo suurtagal ah in la codsado adeegyadan inta lagu jiro uurka. .

Maxaa isbeddelaya marka adeegyada ay bixiyaan adeegyada bulshada ama ilaalinta carruurta ay noqdaan kuwo isku-dhafan?

Marka adeegyada isku-dhafan la hirgeliyo, dadka bixiya adeegyada ilmaha waxay awood u yeelanayaan inay is-weydaarsadaan xog muhiim ah oo ku saabsan ilmaha isla markaana si wadajir ah uga shaqeeyaan xallinta dhibaatooyinka ilmaha.

Waalidiintu markaas uma baahna inay la xiriiraan dhinacyo badan oo kala duwan; xogta muhiimka ah oo keliya ayaa lala wadaagaa xirfadlayaasha ku habboon.

Waalidiintu ma siinayaan oggolaansho in qof walba uu ka hadlo dhammaan dhinacyada nololsha ilmaha.

La-taliyaha adeegga ayaa markaas noqonaya maareeyaha kiiska, wuxuuna dhisaa koox taageero ah, isaga ayaana mas'uul ka ah qorshaha taageerada ilmaha..

Ma diidi karaan ama ka bixi karaan adeegyada isku-dhafan waalidiinta iyo carruurta?

Adeegyada isku-dhafan mar walba waa ikhtiyaari, waalidiintuna way aqbali karaan ama diidi karaan dalabka—marka laga reebo xaalado gaar ah oo ay Child Protection Act No. 80/2002 u aragto inay lagama maarmaan u tahay ilmaha.

Waalidiinta iyo ilmaha labaduba waxay ka laaban karaan codsigooda wakhti kasta.

Xaggee ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada isku-dhafan?

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa Ingiriisi, Polish, iyo Icelandic boggan: www.farsaeldbarna.is

* Sharciga Adeegyada Isku-dhafan ee Daryeelka Wanaagga Carruurta Lr. 86/2021

* Sharciga Ilaalinta Carruurta Lr. 80/2002

* Maareeyaha Kiiska (Case Manager): Qofka mas'uulka ka ah isku-duwidda adeegyada isku-dhafan ee ilmaha u baahan adeegyo heer labaad ama heer saddexaad.

* Kooxda Taageerada (Support Team): Goob ay ku kulmaan xirfadlayaasha bixiya adeegyada ilmaha si ay u wada shaqeeyaan adeegyada isku-dhafan. Kooxdan ayaa dejisa oo la socota hirgelinta qorshaha taageerada.

* Qorshaha Taageerada (Support Plan): Qorshe gaar ah oo qeexaya adeegyada isku-dhafan ee la siinayo si loo taageero wanaagga iyo horumarka ilmaha.

